


Talaalka lidka ku ah jadeecada, xoqatada/qaamo qashiirka iyo jadeeco jarmalka

Vaccin mot mässling, påssjuka och röda hund



Cudurada jadeecada, xoqatada/qaamo qashiirka iyo jadeeco jarmalku waa cuduro aad u faafa. Waxaa aan kugu guubaabineynaa in ay habontahay aad iska talaasho haddii aanad hore iskaga talaalin ama cuduradani hore kuugu dhicin.

Sjukdomarna mässling, påssjuka och röda hund är mycket smittsamma. Vi rekommenderar att du vaccinerar dig om du inte redan fått vaccinet eller har haft någon av sjukdomarna.



Talaalku waa mid bilaa lacag.

Vaccinationen är gratis.



Dadka qaarkoob ma haboono in laga talaalo cudaradaas. Sidaa awadeed waxaa dhakhaatiirta iyo kalkaalisoooyinka caafimaadku u baahanyihiin in ay ogaadaan haddii aad leedahay xasaasiyad, aad jirantahay, aad leedahay uur iyo nooca daawooyinka aad qaadato.

Vissa personer ska inte vaccineras. Läkaren eller sjuksköterskan behöver veta om du är allergisk, sjuk, gravid och vilka mediciner du äter.

Talaalka lidka ku ah jadeecada, xoqatada/qaamo qashiirka iyo jadeeco jarmalka

Vaccin mot mässling, påssjuka och röda hund



Waxaa loo baahanyahay in aad iska qaado qaadi haddii ay jirto suuragalnimo ah in aad leedahay uur. Tijaabada kaadida ee lagaa qaadey waxaa ay muujin doontaa in aad leedahay uur iyo in kale.

Du behöver lämna ett urinprov om det finns möjlighet att du är gravid. Provet kan visa om du är gravid eller inte.



Marka lagu talaalayo waxaa irbad lagaaga mudi/duri doonaa qaybta sare ee gacanta. Waxaa dhici kartaa in ay ku xanuunto gacantu. Waxaa dhici garta in meesha lagaa mudey/durey iyo meelaha u dhow ee ku xeersan ay ku xanuunaan dhowr maalmood ka dib.

När du vaccineras kommer du att få en spruta i din överarm. Det kan göra lite ont. Du kan också känna smärta i området några dagar efteråt.



1-2 todobaad ka dib talaalka waxaa dhici kartaa in aad yeelato xumad iyo jidhka ay finan kaa soo baxaan. Laakiin wax khatar ah kuma jirto isla markaana iskood bey iskaga baabi'i doonaan. Fadlan laa xidhiidh 1177 si aad hesho talo bixin ku wajahan daryeelka caafimaadka haddii uu wax wel-wel ah kugu jiro.

1-2 veckor efter sprutan kan du få feber och hudutslag. Detta är inte farligt och går över av sig själv. Kontakta 1177 för att få sjukvårdsrådgivning om du är orolig.